



# San Diego Unified School District

EUGENE BRUCKER EDUCATION CENTER  
4100 Normal Street, San Diego, CA 92103-2682

---

Abriil 2008

Terry B. Grier, Ed.D.  
Madaxa Waxbarashadda

Mudane Waalidiin ama Dadka ardeyda masuulka ka ah:

Bisha Maarso 24<sup>keeda</sup> waa maallinteedii koowaad ee aan noqdo Madaxa Waxbarashadda San Diego Unified School District. San Diego inaan joogo waan ku faraxsanahay. Wakhti ayaan u hurey inaan booqdo dugsiyada – oo aan la kulmo ardeyda, macallimiinta iyo maamuleyaasha– Waxaan ku rajoweynahay inaan dadka intooda badan la kulmo.

Intii aan shaqeynayey, waxaan soo nodey macallin dugsi sare, tababare waxbarasho, maamule ku-xigeen, maamule dugsi, iyo ku-xigeen madax waxbarasho ee heer degmo. Markii iigu dambaysay waxaa ahaa Madaxa Waxbarashadda Gobolka Guilford ee dawlad-goboleedka North Carolina, waxaan jagadaas hayey ilaa iyo sannadkii 2000. Waxaa hadana sharaf ii ah inaan noqdo madaxiina waxbarashadda

Toddobaadyo badan ayaan San Diego joogey ka hor bishii Maarso 24 keedii, waxaan bartey jaaliyadaha, isla mar ahaantaasna, waxaan taageero ka geystay arrimaha la xidhiidha miisaaniyada oo ahayd taariikhiyan tii ugu qalafsaneyd ee ina soo marta. Miisaaniyada ay dawlad-goboleedka California ka goysay waxbarashadda waa mid aad ugu xun carruurteenna. Arrintaasna waan wada dareensan nahay. Waxaan aad idin ka mahadcelineynaa telefanada, waraaqaha iyo e-mailda aad u dirtaan sharci-dejiyaasha, si ay waxbarashadda u taageeraan. Muddo dhaw waxaan qaban doonaa shirar aan idin kula socodsiiineyno arrimo ku saabsan xaalada miisaaniyada. Waxaan idin ku dhiirigelineynaa inaad shirarkaas ka soo qeybgashaan oo aad ka dhageystaan, wax ka barataan, isla matrkaasna aad magaca carruurteenna ku hadashaan.

Arrimaha miisaaniyada waxaa caawimaad kaga geysan kartaan idinka oo maalin kasta ilmahiinna dugsi u soo dira, marka uu caafimaad qabo. Dakhliga dugsiyadeenu waxay ku xidhan yihiin Celceliska Imaamshaha Dugsi ee Maalin kasta (ADA), waxaana inaga lumeya qiyaastii lacag \$50 maalin kasta ee uu ardey kasta dugsi ka maqnaado. Waxaad isku deydahay inaad fasaxyada qorsheystaan marka uu dugsi xidhan yahay. Taasi waxay caawineysaa dugsiyada iyo ilmaha. Cilmi-baadhis la sameeyey ayaa waxay si cad u muujisay in imaamshaha dugsi iyo guulaha waxbarashadda laga gaadho ay isku xidhan yihiin. Wax badan ayaad ka ogaan kartaa marka aad mareegtan gujisid <http://www.sandi.net/programs/everydaycounts>.

Ardeydu inay dugsi yimaadaan aad ayey muhim u tahay, khaasatan wakhtiga ay ku jiraan imtixaanada xilliga gu'ga la qaado. Natiijooyinka ka soo baxa imtixaanadaas waxay waalidiinta siiyaan sawirka ku saabsan horumarka uu ilmahoodu ka sameynayo xaga waxbarashadda, wuxuu kaloo macallimiinta ka caawiyaa inay ogaadaan meelaha uu ilmuhu u baahan yahay in laga caawiyo. Waxay kale oo waxbarashadda degmada ka caawineysaa inay ogaadaan barnaamijyada dhammaan ardeyda ka taageeraya inay gaadhaan heerka waxbarashadda ee dawlad-goboleedka u dejisan. Natiijada imtixaanada waxay sharci-dejiyaasha dawlad-goboleedka iyo dawlada-dhexe ka caawiyaan inay ogaadaan hufnaanta ay barnaamijyada iyo dugsiyadu u shaqeynayaan.

Waxaan ku rajo eynahay inaan wada shaqeyn doono. Waad ku mahadsan tahay kaalmada ilmahaaga, iyo dhammaan dadka kale, aad siisid inta guriga iyo dugsigaba la joogo. Hawlgalka uu waalidku dugsi ka hawlgalo had iyo jeer guulaha waxbarashadda ee ardeyda aad ayey muhim ugu tahay.

Si Daacadnimo ah,

Terry B. Grier, Ed.D.  
Madaxa Waxbarashadda

**Somali version: Letter to parents - April 2008 DRAFT v3**